


# WAXBARASHADA DADWEYNAHA EE DUGSIYADA H/DHEXE SOOMALIYEED



*Dadka Deggen Bariga Afrika*



SAFKA TODDOBAAD



# MOOJUULKA TODDOBAAD

## DADKA AFRIKADA BARI

Waa urur cashar-diyaarinno ah looguna tala galay inay kaalmeeyaan barayaasha u dhiga safka toddobaad ee dugsiyada asaasiga ah. Cashar-diyaarinnadan waxbarashada dadweynaha ah waxa loogu tala galay inay waafaqsan yihiin mawduucyada manhajka hore uga midka ahaa. Tusaale:

Cilmiga bulshada Safka Toddobaad ..... Dadka Afrikada Bari.

Moojuulkani waxa uu ka kooban yahay lix cashar-diyaarinood oo taxane ah, laakiin baruhu nuxurka casharradan wuxuu u habaysan karaa si alla sidii waafaqsan hawl-maalmeedka. Cashar-diyaarinnadu waa sidatan:-

Casharka Koowaad .....	Dadka Afrikada Bari.
Casharka Labaad .....	Koritaanka tirada dadka.
Casharka Saddexaad .....	Dhibaataada Dadka haysta.
Casharka Afraad .....	Magaalo Afrikada Bari ah.
Casharka Shanaad .....	Ku noolaanshaha Afrikada Bari.
Casharka Lixaad .....	Dadweynaha badhkii.

### Ujeeddooyinka Waxbarasho.

1. In lagu dhiirrigeliyo carruurta siday u caadaysan lahaayeen dareen toosan iyo aragtida isbeddelka horumarka dhaqan-dhaqaale ee bulshadooda, gaar ahaan qiimaynta haweenka.
2. In lagu kaalmeeyo carruurta kor u qaadidda xirfadaha aqoonsiga dhibaatooyinka iyo xallintooda bulsho ahaaneed.
3. In lagu kaalmeeyo carruurta inay si cilmiyeysan u hufaan wararka iyo dhaatahaba taasi oo u suurto gelin karta inay go'aan wax ku ool ah ka gaadhaan.

Kor u qaadidda fikradaha asaasiga ah ee la xidhiidha dadweynaha.

1. Qaybsanaanta kheyraadku waxay raad ku leedahay qaybsanaanta dadweynaha.  
(Waxa laga yaabaa in aanay magaaloooyinka waaweyni lahayn kheyraadka ay dhallinyaradu ka filayso).
2. Isbeddelka dadweynaha waxa dadejiya xaddiyada dhalashada / dhimashada iyo xaddiyada guur-guurka (soo gelid iyo ka bixid).

3. Xaddiyada dhalashada Afrikada Bari waxay ku sugan tahay heer sare taasi oo ay sabab u tahay hiddaha iyo dhaqankooda, kuwaas oo tixgeliya tirada badan, taasoo u baahan dib u eegid lagu salaynayo isbeddelka bulshada.
4. Hoos u dhaca xaddiyada dhimashadu waxay dhaxalsiisay ummadaha gobolkani qodob - tayo - nololeed oo taxane ah oo saameeya heer qoys iyo mid qaranba. Heerka qaran waxaynu ku caddayn karnaa culeyska cunto qaybinta, adeegyada waxbarashada, adeegyada caaf-imaadka, horumarinta biyaha iyo heerarka dakhliga.
5. Inta badan dareenka iyo hab qiimeedka dadku waa ka koowaad ee xukuma qodobada la xidhiidha koritaanka, guur-guurka iyo ilbaxnimada. Qodobadani waxay u baahan yihiin qiimeyn iyo qaddarin.
6. waxa loo baahan yahay in dareenka iyo qiyamka la xidhiidha mawqifka haweenka Afrikada Bari dib loo eego iyadoo lagu salaynayo kor u qaadidda iyo xoojinta tayada nololaha qoyska.

Casharadan oo dhami waxay ku bilaabmaan "fal bilow" waxaana ku xiga "fal barasho", "fidinta" iyo nakhtiin taxane ah.

**Waxa jira falal badan oo la soo jeediyey oo ka badan inta aad isticmaali kartid:-**

Ujeeddada laga leeyahay qorshayaashan waxay tahay in barayaasha la siiyo afkaar iyo dariiqooyin kala duwan oo ah kuwa ugu haboon ee ilaa heer ay adeegsan karaan. Guud ahaan xoogga waxa la saaray (mudnaanta la siiyay) falka (waxyaalaha laga hadli karo, waxyaabaha la qaban karo) gaar ahaan carruurta waxbaranaysa. Waxaannu isku daynay in aan dhiirrigelino carruurta ayagoo barahooda la kaashanaya inay fikiraan, kana hadlaan, qabtaan, iskoodna xal ugu helaan arrimaha yar yar ee la soo kulma, waxaannu aaminsan nahay inay arrintani xiisa weyn ku abuuri karto, kuna dhiirrigeliso inuu dareemo waxbarasho dhab ah.

Dariiqadan carruurta ayaa doorweyn ka ciyaaraysa. Tani ayay waxbarashadu ku noqoneysaa mid midho dhalisa.


*Cabdi Ibraahim Cawaale*  
*Maxamuud Maxamed Xaddi*  
*Shamis Maxamed Nuur*  
*Tony Johnston*

*Mashruuca Waxbarashada Dadweynaha*  
*Wasaaradda Waxbarashada & Barbaarinta*  
*Muqdisho, May 1983.*

## CASHARKA KOOWAAD

### DADKA AFRIKADA BARI

Ku bilow. Ku muuji jaantuska sabuuradda:-



### Doodda Fasalka.

1. Waa maxay ummadaha ku nool Bariga Afrika?

Jawaabtu waa:

Jabuuti.

Kiinya.

Itoobiya.

Soomaaliya.

Tansaaniya.

Ugaandha.

2. Waa maxay dhinacyada ay ummadaha wadammadaasi ku nooli iskaga eg yihiin ama ku kala duwan yihiin? Tusaale:-

Kuwee baa dunida Carabta ka tirsan?

Kuwee baa Muslim ah, Kuwee baa se gaala ah?

Afafkee baa ugu badan inta lagaga hadlo wadammadaasi?

Kuwee baa la gumeystey, Kuwee baa gumeystayaal ah? iwm.

3. Muujinta magaalo madaxyada iyo dariiqyada waaweyn ee isku xira bariga Afrika, baruhu waa inuu ka caawiyaa carruurta siday jaantuska ugu dul muujin lahaayeen .....

Adiis Ababa.  
Nayroobi.  
Muqdisho.  
Daarasalaam.  
Kambaala.

4. Waa maxay miraha ugu muhiimsan ee ka baxa wadammada Afrikada Bari?  
Xaggee ayaan ka helnaa miraha?

Bunka.	ama kadin	Lo'.
Bariiska.		Geel.
Masagada.	ama xayn	Ari.
Shaah.		Riyo.
Galleyda.	Cudbiga.	
Sonkorta qasabka.		

### Fal Barasho.

b) Shaxda soo socota sabuuradda ku muuji .... Afrikada Bari: Waxbarashada dadweynaha

Waddanka	X. dhalashada	X.dhimashada	X.Koror (★) %	Dadweynaha 1980	Dadweynaha 2000
JABUUTI	42	7	3.5	350,000	600.000
ITOOBIYA	50	24	2.6	31 milyuun	53 milyuun
KIINYA	51	13	3.8	16 " "	34 " "
SOOMAALIYA	48	16	3.2	5 " "	10 " "
TANSAANIYA	46	45	3.1	19 " "	35 " "
UGAANDHA	45	14	3.1	14 " "	24 " "


Doodda Fasalka. Su'aalo dhakhso ah:

(★) Kororka dabiiciga ah oo keliya.

1. Waddanke baa hadda ugu dad badan?
2. Waddanke baa ugu xaddi dhalasho sarreeya?
3. Waddanke baa ugu xaddi dhalasho hooseeya?



4. Waddankee ugu xaddi dhimasho sarreeya ..... Kee baase ugu xaddi dhimasho hooseeya?
  5. Waddankee baa ugu xaddi koror badan?
  6. Waddankee baa ugu xaddi koror hooseeya?
  7. Waddankee baa noqon doona ka ugu hooseeya ee dadweynihiisu laba laabmi doono?
- T) Ku dhiirrigeli carruurta inay ka bartaan shaxda soo socota, boqolkiiba inta dadweynaha reer magaalka ah.



Boqolkiiba (%) inta dadweynaha reer


magaalka ah	1950	1980	X. koror
ITOOBIYA	6%	15%	6.6%
KIINYA	7%	14%	6.8%
SOOMAALIYA	17%	30%	6.0%
TANSAANIYA	5%	12%	8.7%
UGAANDHA	5%	12%	7.0%


Su'aalo dhakhso ah:

1. Waddankee baa ugu ilbaxsan?
2. Waddankee baa xaddi kororka ilbaxnimadu ugu dheereynaysaa?
3. Maxay dadweynaha Afrikada bari magaalooyinka ugu soo qul-qulayaan?
4. Waddammadan oo dhan, hal magaalo madax ayaa kuwa kale si dhakhso ah uga hor koraysa, waa tee?
5. Waa maxay sababaha keenay soo jiidashada magaalooyinka waaweyn?
6. Sidee baad si dhakhso ah liis ugu tixi kartaa waxyaalaha magaalooyinka waaweyn ay tahay in laga helo si ay u daboolaan baahida tirada kordhaysaa?

J) Ku muuji sawirkan sabuuradda.

Boqolkiiba inta dadweynaha 15 sano ka yar iyo inta ka weyn 60.  
(Bogga 7aad waxaanu ku sharaxnay sida bayraamidhka loo sawiro).





qoraal

**Qodobbada Doodda:**

1. Maxay u dhacday in carruur badan da'doodu ka hoosayso 15 sano, dad yarna ay ka sarreyso 60 sano?
2. Maxay soo saaraan carruurta ay da'doodu ka hoosayso 15 sano?
3. Maxay u baahan yihiin carruurta ay da'doodu ka hooseeyso 15 sano?

Cunto.  
 dhar.  
 hoy.  
 waxbarasho.  
 daryeel caafimaad.  
 daryeel adeegyada gaadiidka.

4. Ka soo qaad inaad ka mid tahay carruurta da'doodu ka yar tahay 15 sano. Maxaa kale ee aad jeceshahay? Kuma ayey waajib ku tahay in uu keeno waxyaabahan oo dhan?

x) U oggolow carruurta in ay bartaan shaxdan hoos ku qoran :

Dakhliga qofka ★ ★      U.S. \$      ★ ★ Waxa dakhli lagu soo saaray ayadoo la isku qaybiyey qiimaha waxay soo saaraan iyo dadweynihii waddammadaasi (1980).

Itoobiya	130
Kiinya	180
6 Soomaaliya	135
Tansaaniya	160
Ugaandha	280
Maraykanka	10.630
Kanada	9.640
Ustraaliya	9.120
Kuweyt	17.100

Soo saaridda khayraadka ..... Waddammada kor ku xusan kuwee baa leh .....  
 Ceelasha saliidda ugu badan?  
 Meesha ugu dhuxul soo saarka badan?  
 Jidadka baabuurta iyo kuwo tareennada ee ugu casrisan?  
 Meeshee waxyaalo badan lagu warshadeeyaa?  
 Meelaha ugu warshado waaweyn.  
 Meelaha ugu quwadda korontada badan.

Maxay waddammada dakhligooda qof ahaaneed ugu sarreeyaa?  
 Maxay bariga Afrika dakhligooda qof ahaaneed u hooseeyaa?  
Waddammadee baa iska xajin korodhka dadweynaha ee deg-degga ah?

**Sida loo sameeyo "Bayraamidhka" dadweynaha.**

Bayraamidhka dadweynahu waa si sahlan oo lagu muujiyo inta qof ee boqolkiiba isku faca ah. Bayraamidhka dadweynahu waxa uu wax ka sheegaa qaab dhismeedka da'eed ee dadweynaha. Haddii tiro boqoleedka (%) dadka waaweyni sarreeyso ama ay tiro boqoleedka dhallinyartu ay aad u badan tahay, waxa aynu fikrad ahaan heleynaa sida dhakhsaha leh ee uu dadweynuhu u korayo, ama laga yaabo in uu u koroba. Sawirka dhismaha dadweynaha (Bayraamidhka) waxa kale oo uu inoo tilmaamayaa boqolkiiba inta dadweynaha shaqayso, iyo boqolkiiba inta carruur ama dadka da'da ah ee ay inta shaqaysaa ay quudiyaan, sidoo kale, haddii dhismahaas isaga ah loo qaybiyo inta lab ama dhedig ah, waxa aynu kasoo dhexsaari karnaa inta boqolkiiba (%) gabdha ah ee u sii dhawaanaya da'da guurka, inta boqolkiiba haween ah ee jooga da'dii ilmo sidka.

Aynu dhisno bayraa midh sahlan oo muujinaya da'da dadweynaha Soomaaliyeed inaga oo isku darayna labka iyo dhiddigaba, kana matalno in ay u kala qaybsamaan 50 ..... 50 asaas ahaan ...  
 Tallaabada 1aad u qaybi dadweynaha koox da'eed boqolley ah (%)

- 26 - 30
- 21 - 25
- 16 - 20
- 11 - 15
- 6 - 10
- 0 - 5

Waxa annu qaadannay tusaale sahlan.  
 Aad baanay caadi isaga tahay in aan =  
 dadweynaha u qaybino kooxo 5 jira ah.



1.	Tuse :
	0 - 14 sano 43%
	15 - 29 sano 26%
	30 - 49 sano 24%
	50 - 69 sano 06%
	70 iyo wixii ka sarreeya 1%



Tallaabada 2aad. Salka waxaad ka jeexataa layn dhererkiisu dhan yahay 10 sentiimitir,

15


Tallaabada 3aad. Layn qotomana kor ugu jeex halka calaamadda laynka salka jiifa kala badha.

Tallaabada 4aad. Qaado kooxda ugu da'da yar, una qaybi (%) laba isle'eg, ka dibna waxa aad ku cab-birtaa dhinaca aad rabtid ee laynkan qotoma.

$$43 \div 2 = 21.5$$


3

4




Tallaabada 5aad. Sidoo kale mid mid ugu samee koox da'eedyada kale oo dhan (eeg bogga 8aad).

Bayraamidhka dadweynaha ee kooxda 15 jirka ah.



Bayraamidhka dadweynaha ee kooxda 5 jirka ah.



(Waxaad mar labaad kula kulmi doontaa bayraamidhyadan safka 8aad).

Maxaan ka baranaynaa bayraamidhyadan?

Intee dadweynaheenna boqolkiiba (%) ka hooseeya 15 sano?

Intee dadweynaheenna boqolkiiba ka sarreeya 65 sano?

Intee dadweynaha shaqeeya ee lacagi soo gaadhaa?

Haweenka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 65 oo dhami ma wada shaqeeyaan oo dakhli ma soo galaa?

Haddii aanay wada shaqaysan, ma in waliba la sii yareeyaa?

Salka bayraamidhka dadweynaheenna aad buu u ballaadhan yahay. Maxay taasi inooga sheegaysaa xaaladda hadda iyo ta mustaqbalka ee kororka dadweynaha Soomaaliyeed?

Maxaa ku dhacaya kooxaha carruurta ah ee da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 4 marka kooxaha da'doodu u dhaxayso 20 — 25 ay guursadaan?

qoraal

**CASHARKA LABAAD**

*Koritaanka Tirada Dadka*

Ku Bilow:

Sawir barasho.

Xaddiga dhalashada iyo dhimashada ee gobolka Afrikada bari 1960 — 1980

	X. Dha. 1960	X. Dha. 1980	X. Dhi. 1960	X. Dhi. 1980
Itoobiya	51 .....	50	28 .....	24
Kiinya	52 .....	51	24 .....	13
Soomaaliya	49 .....	48	29 .....	16
Tansaaniya	47 .....	46	22 .....	15
Ugaandha	45 .....	45	20 .....	14

Muxuu xaddiga dhalashadu meel sare u taagan yahay?

**B) Fal Barasho.**

(Nakhtiin lagu sameeyay sababaha dhaliya dhalmada heerka sare ee joogtada ah. Halkan waxa aynnu ku soo qaadanaynaa odhaahyo ay soo jeediyeen waalidiin ku nool gobolka . . . waa odhaahyo ku saabsan tirad badan. . . xusuusnow, in aanay waxba ka odhan tayada.

**Aabbo Masay (Kiiniya) ah.**

“Lodaydii waa ay korodhay. Waxaan u baahanahay wiilal badan oo ii daryeela”. Aabbahani wuxuu leeyahay 100 sac. Haddii uu lahaan lahaa saddex wiil kee baa jecnaan lahaa inuu sidiisa taajir noqdo . . . Immisa lo’ ah ayeyse qoys ahaan u baahan lahaayeen in ay haystaan? Haddii uu lix wiil lahaan lahaa immisa lo’ ah ayuu reerku u

baahan lahaa? Ma u malaynaysaa inuu dhulkani qaadi kari lahaa kororka lo'da? Maxaad ku odhan lahayd odaygan si aad u tusto in tayada carruurta ay muhiim u tahay sida tirada badan?

**Hooyo Reer Ugaandha ah.**

“Anagu waxa aannu nahay qoys sabool ah. Waxa aannu u baahan nahay carruur badan si aannu dabadeed u helno qof na xil qaada marka aannu duqowno”.

Ka soo qaad in uu qoyskaasi ka kooban yahay afar wiil iyo afar gabdhood. Oo ay laba wiil kali ihi aadaan dugsiga H/Dhexe. Shaqa nooceeda ayey dadkan yar yari heli karaan? Dakhligoodu noocaa ayuu noqonayaa? Maxaase dhici haddii ay afar carruur yihiin dhammaantoodna ay dugsi sare aadi lahaayeen? Shaqooyin nooceeda ayey carruurtani heli lahaayeen? Dakhligooduse intee ayuu le'ekaan lahaa? Maxaadse ku odhanaysaa hooyadan si aad u tusaaleysid in tayada carruurta ay muhiim u tahay sida tiradooda.

**Aabo Reer Itoobiya ah.**

“Anagu qoys kiristana ayaannu nahay. Qoyska ballaadhani waxa aannu u qabnaa in uu habboon yahay. Sidaa darteed maxaannu uga xumaan, Ilaahay baa wax siinayee”. Qoyska ballaadhani ma farxadbaa mar walba? Maxaa kaloo dhacaya haddii aan cunto ku filan loo hayn ama daryeelka caafimaadka. Maxaase kaloo dhacaya haddii aanay haysan lacag ku filan oo ay ku bixiyaan dharka dugsiga, buugaagta iyo lacagta baska marka ay dugsiga aadayaan?

Maxaad aabbahan odhan lahayd si aad ugu muujiso in tayada carruurta ay muhiim u tahay sida tiradooda?

**Hooyo Soomaaliyeed.**

“Waa in aan dhala carruur badan, maxaa yeelay waxaan ogahay in carruurta qaar kood dhiman doonaan inta aanay waa waynaan”. Soomaaliya sida wadamada Afrika bari oo kale xaddiga dhimashadu hoos ayey si aada ugu dhacday labaatankii ilaa soddonkii sano ee ugu dambeeyay. Sidee baad arrintan hooyadan Soomaaliyeed ugu sharaxaysaa? Immisa carruura ayaa tuuladan ku dhintay sannadkii ugu dambeeyay ama meesha ay ku nooshahayba? Sidee ayaad ugu sheegi kari lahayd hooyadan in uu maanta ilmaheedu ka mustaqbal fiican yahay nolol ahaan kii hore.

Aabo Reer Tansaaniya ah.

“Aad bay muhiim iigu tahay in aan lahaado qoys ballaadhan, sidaas ayaan ku noqon karayaa qof qiimo weyn ku leh tuulada. Dadka kalena ay igu qaddarinayaan”. Ka fikir beeshaada. Waa kuwee dadka xukunka iyo awoodda lehi? Kuwee ayay dadka beeshu qaddariyaan? Ma waxay rumaysan yihiin in qoyska ballaadhani ka sharaf roon yahay qoyska yar? Sidee aad ugu muujin lahayd aabbahan in tayadu muhiim u tahay sida tirada?

Isku celcelinta baaxadda qoysaska dhameyska ah.

Itoobiya :  6

Kiinya :  8

Soomaalá :  7

Tansaaniya :  7

Ugaandha :  7

Jabbaan :  2

Faraansiis :  2

Shiine :  3


## Tilmaan bare.

U oggolow carruurta in ay ka doodaan mid kastaba. Waa in aad looga hadlaa sababta ay dadku muhiimada u siiyaan dhalimada badan . . . sababo wanaagsan ayay waqtigii hore ahayd laakiin dib u eegid ayay u baahan tahay. Siday wadamada Afrikada bari u kordhayaan nuskaa dambe ee qarniga 20aad ayaa isbeddel ku dhacayey adduunka . . . sababahaasoo ahaa in muranka u xaglinaya qoyska ballaadhan u ahaado mid si hufan looga fikiro. Taasoon macnaheedu ahayn in la burburiyo qoyska ballaadhan. (Jiilal dhowr ah oo meel kuwada nool.)


T. (Nakhtiin ku saabsan sababaha ugu wacan hoos u dhaca xaddiga dhimashada).

Xaddiga dhimashada	1960	1980
Itoobiya	28	24
Kiinya	24	13
Soomaaliya	29	16
Tansaaniya	22	15
Ugaandha	20	15

Dib u eeg X. dhimashada ee shaxdii hore.



## Soomaaliya



1. Ku dhiirrigeli carruurta in ay hal abuuraa sheeko tuulo una bilaw sheekada sidan:

"Tani waa tuulo la yidhaahdo Simba oo ku taal Afrikada bari. Waxa dhacday in carruur badani ku le'atay tuuladan, badiba intii ay yar-yaraayeen. Cudurrada faafa . . . oo sannad walba ku dhici jiray.

20 sannadood ka hor tuulada Simba ma lahayn . . . Sidaa darteed cudurradaas si sahlan ayaa loo kala qaadi jiray.

Qashinka lagama ururin jirin. Sidoo kalena biyaha ceelashuna . . .


Dadku ma fahamsaneyn . . . maxaa yeelay in yar ayaa wax qori jirtay waxna akhrin jirtay . . .

20kii sano ee ugu dambeeyay . . . 1. . . . 2. . . . 3. . . .


imminkana carruur yar ayaa dhimata.


2. Adigoo isticmaalaya sheekadan nooceda oo kale, u oggolow carruurta in ay qoraan sheeko aad u fudud oo soo martay dadka soo socda mid ka mid ah.

- Sarkaalka Caafimaadka guud.
- Kalkaaliye caafimaadka degmo.
- Kalkaaliye xannaanada hooyada iyo dhallaanka.
- Dakhtar ka shaqeeya isbitaalka asaasiga ah.
- Injineerka dhismaha oo dhisay ceel cusub.
- Kormeeraha dhismaha oo tuulada u dhisay waddo cusub.



Sheekooyinkan waxa lagu muujiyey sida dadkan aynu kor ku soosheegnay waxqabadkoodu door uga ciyaarayo hoos u dhaca xaddiga dhimashada.





3. Kaalmee carruurta sidii ay u soo koobi lahaayeen iyo sidii ay u sii ballaadin lahaayeen adiga oo u soo bandhigaya ciyaarta soo socota loona yaqaan sare iyo hoos. Ciyaartani waa in ay ardaydu ka fikirnaan sidii ay suurto gal ku noqonayso sare ama hoos u dhaca xaddiga dhalmada. Sare ama u hoos u dhaca xaddiga dhimashada. Jawaab kasta oo ay bixiyaan ardaydu waa in ay kari karaan in ay sheegaan sababtan.

Sare ama hoos u dhaca xaddiga dhalashada.

1. Meel aan dugsi jirin.
2. Meesha ay wali carruurta badani ku geeriyoodaan sannadaha hore ee noloshooda.
3. Meel aanay dadku isku guursan ilaa ay waa weynaadaan (25 ilaa 30 sannadood).
4. Meel ay badanaaba hooyooyinku ku dhalaan ilmahooda hore ka hor inta aanay gaadhin 20 sano.
5. Meel dadku aanu badanaaba wax aqoon.
6. Meel leh xarunta bukaan socod — eegtada casriga ah iyo daryeel caafimaad.
7. Meesha ay carruurtu ku dhashaan isbitaallada halkii ay kaga dhalan lahaayeen guryaha.
8. Meesha ay badanaa hooyooyinku ugu dhasho hal wiil sannad kasta.

Xaddiga Dhimashada sare ama hoose

1. Meel aanay jirin nafaqo darro.
2. meel carruurta oo dhami tallaalan tahay.
3. Meesha la cabbo biyo aan nadiif ahayn.
4. Meesha leh waddooyin xunxun iyo abaaro
5. Meeshay hooyooyin badani ay dhiig yari ku dhacdo. (Birta xadiidka ah ayaa ku yar dhiigooda).
6. Meel ay badanaaba hooyooyinku dhalaan saddexdii ama afartii sano mar.



## CASHARKA SADDEXAAD

Dhibaataada Dadka Haysata

### Ku Bilow:

Bisha soo socota waxa jiri doona shirweynihii Madaxweynayaasha Afrikada Bari. Shirweynahaas oo ujeeddadiisu tahay in la darso dhibaatooyinka badan ee u baahan in laga hortago (la xallilo) si loo hormariyo habka nololeed ee ay ku nool yihiin dadyowga deggan gobolkaasi. Waxa laga yaabaa inay jiraan dariiqooyin kala duwan oo ay wadammada kala duwani iska caawin karaan si ay uga baxaan dhibaatooyinka. Madaxweyne kastaa waxa uu la iman doonaa dad garaad fiican leh oo isugu jira rag iyo dumar labadaba oo la taliyayaashiisa ah. Waxa lagu doorday in aad xubin ka noqoto kooxahaas. U qaybi fasalka shan kooxood. U oggolow koox kasta in ay doorato (xusho) waddankii uu wakiilka ka noqon lahaa.


Xoghayaha Shirweynuhu wuxuu u diray warqad dheer dhammaan Madaxweynayaasha, isagoo isku dayey inuu wax ka sheego dhibaatooyinka gobolka. Waa in aad adigu la talisid Madaxweynahaaga waxa uu ka odhanaayo dhibaato kasta. Waa in baruhu ku qoro sabuuradda dhibaato kasta.

### Dhibaataada 1aad.

“Soddonkii sano ee ugu dambeysay dadweynaha ku dhaqan geeska Afrikada bari si dhaqso leh ayuu u kordhay. Koritaanka dadweynuhu waxa uu ka dhakhso badnaa kan v. ix soo saarka.

U fiirso tusaha soo socda. . .”

Dadweynaha Gobolka		1960		1980
		Kororka xaddiga isku cel. dadweynaha soo saarka cuntada qofkiiba.		
Itoobiya	2.2%	84	—	16
Kiinya	3.3%	92	—	8
Soomaaliya	2.8%	85	—	15
Tansaaniya	3.4%	94	—	6
Ugaandha	3.2%	90	—	10
		1970	100	— laga jaray.




**Dhibaataada 2aad.**

Sannadahan dambe, dadweynaha ku dhaqan geeska Afrikada Bari oo tiradoodu sii ballaadhanayso taasoo keentay in aanay ummadahaasi awoodi karin in ay meel walba dugsi uga dhisaan carruurtooda gaadhay da' dugsiyeedka".

U fiirso tusahan ku lifaaqan jadwalka.

Boqolkiiba wiilasha iyo gabdhaha is qoray dugsiiga asaasiga 1980.

Itoobiya	38%
Kiinya	99%
Soomaaliya	44%
Tansaaniya	70%
Ugaandha	50%



### Dhibaatada 3aad.

"Dad aad u tiro badan oo ka mid ah ummadaheenna ayaan waxna akhriyi karin waxna

### Dhibaatada 3aad.

"Dad aad u tiro badan oo ka mid ah ummadaheenna ayaan waxna akhriyi karin waxna qori karin. Marka tirada dadku aad u korodhaba waxa sii adkaada helitaanka lacagta iyo khayraadka looga baahan yahay wax baridda qof kasta."

Dadweynaha boqolkiiba inta wax taqaan 1980.

Itoobiya .....	15%
Kiinya .....	45%
Soomaaliya .....	50%
Tansaaniya .....	66%
Ugaandha .....	42%

### Dhibaatada 4aad:



"Wadammada Afrikada bari badankoodu waxay tababaraan dhakhtarro tiro badan, laakiin wadammadaasi badankoodu waxaa la ogaaday inay weli jirto dhakhtar yari, taasoo halkii dhakhtarba ay ku soo hagaagto 10.000 oo qof. Marka tirada dadweynuhu sii korodhaba waxa adkaada sidii loo hagaajin lahaa saamigani.

Tirada dadka ee dhakhtar kiiba ku soo soo hagaagtay 1980.

Itoobiya .....	73,000
Tansaaniya .....	17,000
Ugaandha .....	26,000
Kiinya .....	11,000
Soomaaliya .....	20,000

(Ugu dhowaan 10.000)

18



**Dhibaataada 5aad:**

“Tiro yar oo ka mid ah dadka ku dhaqan bariga Afrika ayaa si joogto ah biyo nadiif ah u hela. Marka tirada dadku badatoba waxa sii adkaada helitaanka biyaha ee qof walba. Eeg tusaha hoose”.

Boqolkiiba dadka hela biyo joogta ah oo nadiif ah 1975.

Itoobiya .....	6%
Kiinya .....	17%
Soomaaliya .....	33%
Tansaaniya .....	39%
Ugaandha .....	35%

**Dhibaataada 6aad:**

“Gobolka Afrikada bari korodhka dadweynuhu aad buu uga dheeraynayaa khayraadkiisa. Kororka dadweynuhu aad ayuu uga dheereeyay dakhliga dadka. Inta yar ee la soo saaro waa in loo qaybiyaa dadweynaha dhakhsaha u koraya. Eeg tusahan”

Daddiga kororka dadweynaha 1980		Xaddiga kororka dakhliga qofkiiba 1970 — 1980	
Itoobiya	2.6	1.3%	
Kiinya	3.8	2.7%	
Soomaaliya	3.2	0.5%	
Tansaaniya	3.1	3.1%	
Ugaandha	3.1	0.2%	




1. Si fiican u daris weedh kasta.
2. Tusaha warbixintu ma waafaqsan yahay weedha. (Waayo mararka qaarkood waxa dhici karta in aannu tusuhu wada muujin warbixinta loo baahan yahay.)
3. Marka aad dhibaato walba ku dhigto sabuuradda..... weydii su'aalahani .....  
 Kororka dadweynuhu ma yahay waxa keliya ee dhibaataada abuura?  
 Maxay noqon karaan sababaha kale ee abuuri kara dhibaataada?  
 Haddii xaddi korodhka dadweynuhu intaa ka yar yahay ma caawin lahayd xallinta dhibaatanadan?
4. Koox walba ama wafdiga la taliyaasha ahi, waa inay qaataan warbixinnadii la siiyey una habeeyaan hab looga doodi karo dhibaatooyinka dadkooda. Ka dibna waa in loo gudbiyo warbixinta fasalka.
5. Marka ay taasi dhammaato ardayda wufuudda ahi waa inay mar labaad darsaan tusayaasha iyo dhibaataada, sheegaanna sidii loo qorshayn lahaa.....
  1. Sidii looga guulaysan lahaa ama
  2. Loo xallili lahaa dhibaataada.
  3. Waa in wax la baro dadka si ay uga hortagaan dhibaataada.
 Ardayda ha lagu dhiirrigeliyo sidii ay ugala doodi lahaayeen fasalkooda xallinta dhibaatooyinka.

**Tilmaan bare:**

Waaya aragnimadeennu waxay ina tusaysaa in fasalladu heleen xallinta dhibaatooyinkan....., taasoo maicanheedu tahay in la kharash gareeyo lacag aad u badan.

Tusaale ahaan; waa in aynu tababarno dhakhaatiir badan. Waa in aynu dhisno dugsiyo badan..... ama qodno ceelal badan oo biyo nadiif ah leh.

Waxa lagama maarmaan ah ama muhiim ah in la weydiiyo carruurta halka ay lacagtani dheeraadka ahi ka iman doonto! (Marka ay tirada dadweynuhu si aad ah u korodhaba waxa isbeddela dhismaha da'eedka. (Tiro badan oo ka hooseysa 15 sano marka loo eego da' kooxeedka.) Waxa yaraada tiro boqoleedka dadweynaha shaqeeya, waxana la yaraada kuwa cashuurta laga qaado.



**CASHARKA AFARAAD.***"Magaalo Afrikada Bari ah"*

20,000

+3%

=20,600

+3%

=21,218

+3%

=21,854

+3%

=?

**Ku Bilow.** Labo layli ayuu ka bilaabmaa casharkani. Jawaabuhuna waa kuwo ku yaab leh. Ku kaalmee ardayda inay ka shaqeeyaan layliyadan soo socda:

**Layliga 1aad.** Dadweyne gaadhaya 20,000 ayaa ku nool tuulo afrikada bari ah. (Ugu yaraan dadka oo dhami waa beeraley, waxay beertaanna galley iyo sareen. Qaarkoodna waa lo'ley. Xaddi korodhka dadweynuhu boqolkiiba waa 3 sannadkiiba, taas oo la mid ah badanaaba korodhka ka dhaca meelaha baadiyaha ah. Maxay noqon doonaan dadweynaha tusaalahani toban sano ka dib?)

**Layliga 2aad.** Dadweyne lagu qiyaasay 20,000 ayaa ku nool magaalo afrikada bari ah. Waa magaalo tusaale wacan u noqon karta meel lagu kala iibsado wax yaalaha warshaduhu soo saaraan.

Dadweynaha magaaladan xaddi kororkiisu waa 6 boqolkiiba sannadkiiba, taasoo ah xaddi kororka magaalooyinka afrikada bari intooda badan.

Muxuu noqon doonaa dadweynahaasi toban sannadood ka dib? Jawaabtu ma aha 20,000 oo lagu dhuftay 3 ama 6. Baruhu ha ku kaalmeeyo ardayda inay ka shaqeeyaan ama soo saaraan koritaanka labada sannadood ee hore, si ay caruurtu u fahmaan kororka dabiiciga ah.

**Doodda fasalka.**

1. Waa maxay wadarta tobanka sano ee layly walba?
2. Wadartee baa ugu badan?
3. Immisa ayaa ku kordhaya magaalada tobankaa sano ka dib? (Jawaabta layliga 1aad ka soo qaado layliga 2aad).
4. Muxuu u dhacay faraqan weyni?
5. Muxuu koritaanka magaalooyinku laba jibbaar uga batay koritaanka meelaha miyiga ee afrikada bari?
6. Xaggee bay ka imanayaan dadka dheeraadka ah ee inasiinaya xaddi kororka boqolkiiba 6da ah?

**Fal barasho.**

B. U oggolow carruurtu inay darsaan garaafka hoos ku dhigan boqolkiiba inta: dadweynaha reer magaalada ah ee ku nool caasimadda ugu weyn.

Itoobiya	(Addis-Ababa)	37
Kiinya	(Nayroobi)	57
Soomaaliya	(Muqdisho)	45
Tansaaniya	(Darasalaam)	50
Ugaandha	(Kambaala)	52

**Doodda fasalka.**

1. Maxay caasimaduhu muhiim u noqdeen? Maxay u shiiqiyaan xajmiga magaalooyinka kale ee dalka?
2. Adoo la kaashanaya baraha sharax waxyaabaha laga qabto caasimadaha waaweyn.

Xarunta dhexe ee dawladda.


Xarunta dhexe ee bangiga.

Meelaha warshadaha waa weyn leh.

Meelaha xarumaha ganacsiga waa weyn ka socdo.

Goobaha maaweelada.

Dakadaha iyo garoomada dayuuradaha.



3. Maxay caasimaddu u soo jiidataa dhallinyarada?

Waa xarun waxbarasho.

Waxaana ah dugsiyo sare oo badan, kulliyado iyo jaamacado.

Waa xarunta madadaalada.

Waxay leedahay dukaamo casri ah iyo makhaayado.

Waxaa laga helaa shaqooyin shaar cadde oo ay ka midka yihiin; bangiyada, ganacsiga iyo xafiisyada dawladda.



4. Maxay caasimaddan weyni uga hor kortaa si dhaqso ah magaalooyinka kale oo dhan? Maxaa yeelay, waxay leedahay mashaakillo fara badan oo aanay lahayn magaalooyinka yar yari.

Maxay noqon karaan mashaakilladaasi?

Mutacallimiin shaqo la'

Muran ka dhaca suuqyada iyo dambiyo kale.

T) Ku dhig sabuuradda tusahan soo socda.

	Boqolkiiba dadka inta beerayelda ah (wax beerata)	Boqolkiiba dadka inta ka shaqeysa warshadaha
Itoobiya	80%	7%
Kiinya	78%	10%
Tansaaniya	83%	6%
Soomaaliya	84%	8%
Ugaandha	83%	6%

#### Doodda fasalka.

1. Maxay wadammada afrikada bari dad badani beeraha ugu xidhan yihiin, in yarina ugu xidhan tahay warshadaha?
2. Tirada dadka beeraleyda ahi way kordheysaa laakiin boqolkiiba hoos bay u dhacaysaa, sidee bay tani u dhacdaa?
3. Maxay boqolkiiba dadka beeraleyda ahi hoos ugu dhacaan?
4. Maxay dhallinyarada iyo dadka aqoonta leh ee reer baadiyaha ahi ugu guurayaan magaalooyinka waaweyn?
5. Badanaaba faa'iidooyin wanaagsan ayaa lagala kulmaa ganacsiga yar yar ee magaalooyinka (maxay noqon karaan?) Maxaa dadkaas ku kalifay in ay ka tagaan beeraha oo ay u guuraan magaalooyinka? Maxay dadku u nacayaan beeraha iyo nolosha baadiyaha?
6. Dad badan oo reer miyi ah ayaa waxay moodaan in nolosha magaalooyinku tahay mid aad u xiiso badan. Haddii ay sidaa ugu muuqato maxaa u sabab ah? Haddii aanay ahayn maxay u noqon weydey?





J) Marka dad badani ka soo guuraan miyiga oo ay yimaadaan magaaloyinka, ayaa waxa dhacda in magaaloyinku si dhakhsa ah u koraan. Daris tusaalaha hoos ku qoran.


1. Muqdisho oo ah magaalo madaxda Soomaaliya, waxay leedahay waqtigan xaadirka ah 12,000 oo khasabado biyood oo ku jira guryaha iyo 295 ceel oo caadi ah. Tirada dadka ku dhaqan magaalada Muqdisho waxaa lagu qiyaasay 800,000 oo qof. Waxaa loo malaynayaa in sannad kasta 24,000 oo dad ahi soo galaan si ay ugu noolaadaan Muqdisho, bal aan eegno dadka Muqdisho soo galay oo dhan oo helay biyo nadiif ah. Haddaba, Sannad walba waa in Muqdisho loo dhisaa nidaam biyo gelin cusub ah oo laba jibbaar ka weyn kan haatan jira.
2. Madaxda guryaha ee Nayroobi waxa ay qabaan in waqtigan xaadirka ah ugu yaraan 100,000 oo qof ay ku nool yihiin gurya aan caafimaad darro awgeed loogu jiri karin caasimadda dhexdeeda.



Taasoo ay macnaheedu tahay in aanay guryahani biyo nadiif ah iyo musqulaba lahayn.

Sannad kasta 700 ilaa 800 oo guryo cusub ah ayaa la dhisaa oo qiimo jaban ah. Taasoo waxqabad fiican ah.

Waxa lagu qiyaasay in ka badan 8,000 oo qoysas cusub ahi ay soo degaan Nayroobi.

1. Magaaloyinka waaweyni ma xamilayaan dadka ku soo shubmaya?





25

2. Marka laga reebo guryaha iyo biyaha, waa maxay daryeelka kale ee nabadgelyada nafta u fiican ee caasimadaha laga helaa?

Ka dooda waxa ku dhici kara caasimadda dadka caasimadda haddii aanay jirin.....  
Biyo nadiif ah.

Nidaam suga wasakh fageynta.

Nidaam habboon oo qashin ururin ah.

3. Waa maxay macnaha ereyga "Dikhow"? Immisa hab oo kala gadisan ayey caasimadda weyni u dikhoobi kartaa?

(Baraha ayaa ka kaalmeyn doona).

- X. Haddii dugsigaagu yahay dugsi tuulo, ku dhiirrigeli carruurta in ay u diraan warqad dugsi ku yaalla caasimadda, kuna weydiinayaan.....

Waxa ay carruurta caasimaddu cunaan.

Qiimaha cuntada caasimadda.

Alaab ka gashada caasimadda..... alaabta laga soo gadan karo iyo qiimaha laga dhiibay.

Ku noolaanshaha caasimadda ..... guryaha caasimadda..... biyaha caasimadda, nalka caasimadda, gaadiidka caasimadda iwm.

Dhinca kale haddii uu dugsigu ku yaallo magaalo ama caasimad.

Saaxiibkeygii qaaliga ahaayow,

Anigu waxa aan ku noolahay tuulo yar oo baadiye ku taal loona yaqaan..... waxa aan warqaddan kuugu so qorayaa in aan ogaado sida loogu nool yahay caasimadda.....

**NAKHTIIN: Sidee bay meel / dadweyne isu beddelaan?**

**1983 bishii Jannaayo Tuulada Bir Hakim ddweynuhu wuxuu ahaa 1000**

**26**



**Bishii Disember 1983 Tuulada Bir Hakim**

Dadweynaha	1000	(Jannayo)
Dhalashada sanadkii	+ 48	
	= 1048	
Dhimashada sanadkii	- 18	
	= 1030	


(Kororka dabiiciga ah)

Soo geleyti

1030
+ 150
1180
- 60
1120

Intii ka guurtay

*Bishii Jannaayo 1984 Tuulada Bir Hakim*



Dadweynaha	1983 = 1000
	1984 = 1120
Kororka dhabta ah	120
ama	8%

## CASHARKA SHANAAD.


"Ku noolaanshaha Afrikada Bari"

### Tilmaan bare.

Waxa jirta maahmaahaha Kiinya ah oo ku odhanaysa . . . . "Aada ka mas'uul ah nolohaada (ama qofku isaga ayaa ka mas'uul ah caafimaadkiisa)", waxa kale oo jirta maahmaah Soomaali ah oo odhanaysa "ninka nacaska ahi wuxuu qaladaadkiisa saaraa Ilaahay," isaga oo odhanaaya Ilaahay baa ii gartay. Casharkani waxa uu sugayaa anshaxa. Hoos waxa ku qoran weedho caan ku ah afrikada bari. U oggolow carruurta inay ka doodaan weedh kasta ayaga oo sheegaya hadba midka khaladka ah ama tan saxa aha. Weedhuhu ma waxa ay caddaynayaan anshax xun mise anshax wanaagsan? Sheeg sababta?

1. "Waa waqti lumis in dariishadaha iyo albaabada lagu sameeyo daahyo. . . . . waayo duqsigu isfa sidii hore ayuu u soo galayaa, duqsigu waa dhibaato kaliya".
2. "Awowgey Aabbo dhulka wuxuu u falan jirey siadan oo kale, Aabbahayna wuxuu u fashaa dhulka sidii aabbihii u falan jirey. Haddaba, wixii iyaga u wanaagsan ayaa anigana ii fiican".
3. "Caasimaddu waa meel madadaalo iyo maaweelo leh. Waxaana ah shaneemooyin, ciyaaro, baabuur la kaxaysto iyo waqti qaadasho fiican. Anigu waxaan aadayaa caasimadda".
4. "Carruurteyda kale lama tallaalin haatanna way iska caafimaad qabaan, maxaa igu kallifaya in aan tago Xarunta Bukaana-socod-eegtada, ma ilmahayga ayaan la doonayaa dhaawac?"
5. "Anigu waan garanayaa inaan wax qori karin, waxna akhriyi karin. Waayo anigu waan ka weynaaday waxbarshada imminka, maxaan isugu kallifayaa? Waxaa intaa sii dheer, fasallada oo dhan waxaa ku jira carruur yar yar, isla markaana waxay ugu muuqanaysaa qof nacas ah".
6. "Shaqooyin badan ayaa qofka shahaadada dugisga dhexe haystaa ka helayaa caasimadda, wax dhibaato ahna kala kulmi maayo. Waxa kale ee jiraa anigu saaxiibaday ayaan iskala joogayaa ilaa inta aan shaqo ka helaayo".
7. "Ragga kale ee tuuladu ha iska kaashadeen buuxinta biyo fadhiisinnada. Anigu waxaan ahay mashquul imminka".
8. "Maxaa mushkilad ah ee ku jirta haddaan shaqada goor dambena galo horena uga baxo, sababtoo ah waa shaqo dawladeed. Kuma ayaan ka baqayaa?"

27





9. "Anigu waxa aan ahay xirfadle. Sidaa darteed, waa in aan wax bartaa si aan u xaqiijiyo heerkeyga aqooneed ee hadda. Maxaan yeeli karaa, si aan uga soo shaqeysto dibedda lacag badan? Si dhakhsa ah ayaan u baxayaa".
10. "Waa maxay faa'iidada ay leedahay in gabdhaha dugsiga lagu daro. Waxa ay sugtaa waa guur uun, sidaa awgeed, maxaan lacag ugu kharash garaynayaa".
11. "Waa shaqada ninka inuu sameeyo go'aannada muhiimka ha. Shaqada dumarkuna waa in ay guriga joogaan oo ay carruurta xannaaneeyaan, maxaan ugu kaalmeynayaa jikada".
12. "Waan garanayaa inay hooyaday naaska jaqsiin jirtay carruurteeda oo dhan, taasoo ah wax laga tegey, immikase waxaa howl-yar in ilmaha la baro masaasadda".
13. "Anigu kuma qubo qashinka jidadka sidaa darteed, uma arko sabab aan u nadiifiyo jidadka. Ciddii ay khuseysaa ha nadiifiso".
14. "Marka aan weynaado waxaan jeclahay in aan yeesho qoys ballaadhan. Ma laha dhibaato haddii carruurtu iska daba dhal-dhashaan, waayo Ilaahay baa wax siinaya".
15. "Shaqada ugu fiicani waa tan aanay gacmahaaga wasakhi gaadhin. Beer-faliddu ma aha shaqadaydii iyo shaqada warshaduhuba".
16. "Maxaa ka micna ah haddaan shaqo waayo. Aadna u raadin-maayo. Waxaan ka imid qoys ballaadhan, eheliyadeydaana i xannaaneyn doonta".
17. "Anigu waan ogahay in ragga kale tuulada oo dhammi ay ka qayb qaadanayaan qoditaanka ceel cusub. Laakiin anigu waan daalanahay maanta, berrito ayaanse la shaqayn doonaa".

#### Maahmaahyo:

Dadka oo dhami waxay leeyihiin odhaahyo xambaarsan war-murtiyeedyo. Hase yeeshee mararka qaarkood micnaha runta ah ee odhaahyada . . . ama maahmaah-yadanba ma cadda. Ma ku caawin karaan carruurta inay raadiyaan micnaha runta ah ee ka dambeeya odhaahyada?

#### Maahmaah Kiinya:

Far qur ahi shilin ma disho (immisa farood ayaa loo baahan yahay?)

#### Maahmaah Soomaaliyeed:

Lafba lafta xigta ayaa lagu kabaa.

- Maahmaah Soomaaliyeed: Anaa ah ayaa ka roon aabbahay ayaa ahaan jirey.
- Maahmaah Kiinya ah: Ninka waxqabadkiisa ayaa ka qiimo badan dhalashadiisa dhabta ah.
- Maahmaah Kiinya ah: Nin carruur lihi cidla ma seexo.
- Maahmaah Soomaaliyeed: Tagtaa daaye timaadda ogow.
- Maahmaah Soomaaliyeed: Ha iska baabi'in waxa aad maanta haysatid aad berri u aydide.
- Maahmaah Kiinya ah: Nin gaajoonaya shaqo badan ma qabto (Calool madhani ma ciidamiso).
- Maahmaah Soomaaliyeed: Midho guntiga ku jira midho geed saaran looma daadsho.
- Maahmaah Soomaaliyeed: Waxaan gacantaada ku jirini afkaagay ka raagaan.
- Maahmaah Soomaaliyeed: Qorshaha fiicani waxa uu u faa'iideeyaa ubadkaaga dambe.
- Maahmaah Kiinya ah: Ku fara adkow waxaad haysato inta lagaa muquuninayo.

Weydii carruurta in ay yaqaaniin wax maahmaahyo ah. U oggolow in ay fasalka ka sheegaan sharxaanna micnaha. Haddii uu kani yahay cashar.... ama casharro taxane ah, kaasoo ku xidhan micnaha ereyada..... hoosna waxa ku taxan erayo inta badan lagu isticmaalo waxbarashada dadweynaha.

Carruurta ma kartaa.....



"Af daboolan waa dahab."

"Bur gade iyo biyo gade way isu baahan yihiin"



qoraal

- 1. In ay u dhigaan ereyada siday xuruuftu u kala horreyso, iyaga oo adiga kula kaashanaya micnaha mid kastaba.
- 2. Buugagga taariikhda ha ku qoraan cinwaannada ugu dhigan qaamuuska dadweynaha.

Tirokoob.	Magaalo.
Guuritaan (dhoofitaan).	Korodhka caadiga ah ee dadweynaha.
Soo gelitaan.	Xaddiga dhalashada.
Bixitaan.	Xaddiga dhimashada.
Dhalashada.	Dhismaha (dadweynaha).
Dhimashada.	Dhismo da'eedka (dadweynaha).
Dadweynaha.	Korodhka (dadweynaha).
Dad yar.	Hoos-u-dhaca (dadweynaha).
Dad badan.	Jinsiga (dadweynaha).
Cudurrada.	Bayraamidka (dadweynaha).
Ku tiirsanayaal.	Saamiga ku tiirsanayaasha.
	Fil kooxeed.

**CASHARKA LIXAAD***Dadweynaha badhkii*

**Tilmaan bare:** Haweenku nus ayey ka yihiin dadweynaha waddammada Afrikada Bari inta badan. Run ahaantii, in kasta oo ay wiilal badani dhashaan, haddana gabadha ayaa ka nolal badan. Haweenku wey ka cimri dheer yihiin ragga. Waa lagama maarmaan in aad ogaatid doorka dumarka bulshooyinka waddammada Afrikada Bari ka qaataan tayada nolosha ee qoyska, taas oo toos ugu xidhan tayada dumarka.

**Ku bilow:** Ku qor tusahan xambaarsan warbixinta sabuuradda. Carruurtana u sharax in marka 100 wiil Dugsiyada H/Dhexe la qoraba, gabdhana 60 la qoro waddammada Afrikada Bari. Dariiqadda kale ee lagu bilaabi karaa casharkan waa tiyoo ay ardaydu hubiyaan tirada carruurta qoran ee dugsigooda.

B. Boqolkiiba gabdhaha la qoray heerka Dugsiga H/Dhexe.

Itoobiya .....	30
Kiinya .....	94
Soomaaliya .....	32
Tansaaniya .....	61
Ugaandha .....	41

(Waxa kale oo aad middan ku muujin kartaa saami ahaan sida kor ku cad)

Waqti sii fasalka, si ay u bartaan tusahan inta aanad weydiin ka hor.

1. Maxay gabdhaha tiro yari dugsiga isku qoraan?
2. Gabdhaha dugsiga aadayaa ma in ay wiilasha le'ekaadaan ayey jecel yihiin?
3. Muxuu qoysku ugu dari waayey gabdhahooda dugsiga?
4. Maxay muhiim u noqotay in gabdhuhu dugsiga aadaan? (Halkan baruhu waa in uu u sharxaa carruurta in marka ay gabadha waxbarashadeedu korodhaba in ay nasiib u yeelanayso, caafimaad-qabka qoyskeeda, mustaqbalkana mid caafimaad badan oo is-raacsan uu noqonaayo).






**Fal barasho:** Waxaan u soo jeedineynaa in la sii wado habkan. Tusaha soo socda sabuuradda ku qor.

B) U sharax carruurta in gabdhaha baadiyaha ku nool ee waddammada Afrikada Bari badankood oo ah kuwa ugu badan ku guursadaan inta aanay gaadhin 20 sano. Qaar badani waxa ay guursadaan ayagoo aad u yaryar.

Isku celcelinta da'da guurka ee gabadha reer miyiga ah.

Afrikada Bari 1980



Sii fasalka waqti ay ku bartaan tusahan inta aanad weydiin.....


1. Waa maxay fikradda fasalku ka qabo ee ah da'da ugu fiican ee wiilku ku guursan karo iyo da'da ugu fiican ee gabadhu ku guursan karto?
2. Maxay wiilashu uga da' weyn yihiin gabdhaha waqtiga guurka? (Waayo tan ayaa jawaabta ina siinaysa).
3. Waa maxay sababaha ugu fiican ee in hore loo guursado?
4. Waa maxay sababaha ugu fiican in dib loo dhigo guurka adigoo da' weyn?

J) Garaafka soo socda sabuuradda ku dhig. U sharax fasalka in dumarka ku dhaqan waddammo badan oo ah Afrikada Bari ay helaan ilmahooda ugu horreeya isla guurkooda ka bacdi, badiba ka hor inta aanay gaadhin 19 ama 20 sano.

Isku celcelinta.

Waddammada oo dhan.

Dhimashada 1000kiiba.



Sii carruurta fasalka ku jirta waqti ay ku darsaan garaafka ka hor inta aanad weydiin su'aalahaan soo socda:

1. Midkee ugu nabadgelyo badan in ay hooyadu yeelato ilmaheeda ugu horreeya ka hor ama ka dib, da' ahaan 20 sano.
2. Haddii laba qof hore isu-guursadaan, waa maxay sababaha ay muddo u sugaan ilmahooda hore?
3. Maxaa tabaabushe ah ee ay u baahan yihiin waalidku inta aanay dhalin ilmahooda kowaad, ka labaad? Maxaase labadaa u dhexeeya?

< 20 ● ● ● ● ● ● ● ● ●

Iyo **Dhicisyada**  
(Abaydinka nolol la'aan  
ku dhashay 1000kiiba).

40<sup>+</sup> ● ● ● ● ● ● ● ● ● ● ●

34



6-8

X) Sawirka soo socda ku qor sabuuradda.

U sharax carruurta fasalka ku jirta in qoysaska ku nool waddammada Afrikada Bari ay guud ahaan aad u ballaadhan yihiin.

Baaxadda isku celceliska qoyska dhan.

(Dumarka da'doodu tahay 45 ilaa 49 sano).


Sii ardayda waqti ay ku darsaan sawirkan ka bacdina weydii.....

1. Maxaad u malaynaysaa sababaha ay ka qabaan qoyska ballaadhan haweenka Afrikada Bari?
2. Marka aad guursato, immisa carruur ah ayaad jeceshahay inaad yeelatid? (Inamada fasalka ku jira miyey ka jecel yihiin gabdhaha qoyska ballaadhanm miser arrintu waa sida kale?)
3. Ka hor inta aanay ku fikirin qoys fiican waa maxay waxyaabaha kale ee loo baahan yahay in aad ka fikirtid?
4. Waa maxay sababaha kuu oggolaanaya in aad yeelatid qoys ballaadhan?
5. Kuma ayaa inuu inoo go'aamiyo tahay arrintani? Ma hooyada iyo aabbaha oo wada jira? Aabbahoo keliya? Hooyadoo keliyaa?

Kh) Ku qor sabuuradda garaafka soo socda. Carruurtana u sharax marka ay qoysasku ballaadhan yihiin. Hooyooyinku badanaaba waxa ay yeeshaan ilmahooda ugu dambeeya markay 40 sano kor u dhaafaan.

Dumarkii u umul raacay da' awgeed ee waddammada Afrikada Bari 1980.

Dhismaha 1000kii  
carruur ah ee noolol  
ku dhalataba.



"Eeg shaxda ku taal bogga 12 aad."  
Mahadsanid.

U oggolow ardayda waqti ay ku darsadaan tusahan ka hor inta aanad weydiin.....

1. Hooyada ma waxa u nabadgelyo badan in ay ku dhasho 40 jir ka hor mise ka dib?
2. Carruurta ay dhalaan haweenka da'dfoodu gaadhay 40 sano ma la odhan karaa ayaga ayaa ugu khatarsan dhinaca dhimashada abaydinka?

(Waxaan kaloo ognahay in dumarka ay da'doodu sarreyso ay dhalaan carruur maskaxda ka jirran.)

3. Haddii hooyada da'deedu tahay 40 sano ay dhasho cunug, immisa jir ayey noqonaysaa hooyadu marka u horreysa ee ilmaheedu dugsiga tago.

Markuu dhammaysto dugsiga?

Markuu guursado?

Ku celi ardayda si ay uga bogtaan tusayaasha, garaafka iyo sawirrada. Ma sheegi karaan sidii aynu gabdhaha u kaalmeyn lahayn si ay uga suurtoowdo in ay guulo wax ku ool ah gaadhaan?

Sawir xiiso leh....

Marka ay gabadhi u dhalato maanta Afrikada Bari..... waa maxay nolosha ay filanaysaa? Waa maxay waxyaabaha ugu weyn ee nolosheeda soo maraa? Goormaa ayey waxyaalahaasi dhacaan? (Si aan u sawirro sawirka hoos ku qoran waa in aan isku celcelinnaa warar badan. Celcelisyaduna qof-qof wax inoogama sheegaan. Sidaa darteed, waa shax xiiso leh. U dhaaf ardayda in ay ka doodaan dhacdo walba oo sabuuradda ku dhigan.)

